

Soonka iyo Nadiifinta Nafta

Af-Soomaali



Waxaa diyaariyay:

Xasan Xirsi Cali



رمضان وتزكية النفس من الذنوب

باللغة الصومالية



إعداد:

حسن حرسى علي

Qodobada ugu muhiimsan ee ku jira qormadan

- WANAAGA IYO KORAYNTA AY NAFTU KA HESHO BISHA RAMADAAN.
- ABAAL MARINTA DADKA SOOMAN LEEYIHIIN.
- UJEEDEEDA ILAAHAY -KOREEYE- KA LEEYAY SOONKA.
- ALBAABKA AY JANADA KA GALAYAAN DADKA SOOMAN.
- CIBAADADA IYO WANAAGEEDA.

Islaamku wuxuu u yimiday bad-baadada iyo naxariista bini'aadamaha sidaas oo kale ayuu inuu dadka wanaajiyo, nadiifiyo kana dhiggo ruuxa aadamaha ah mid fiican oo daahir ah, si marka uu dhamaysto safarkiisa adduunyada ee uu gaadho meeshii yoolkiisu ahaa u noqdo qof u diyaarsan dagaanka dadka wanaagsan waa Janadee.

قال تعالي: (طَبَّبْتُمْ فَأَدْخُلُوهَا خَالِدِينَ) .

Kadibna uu ku raaxaysto aragtida wajiga Ilaahay - koreeye- ee maamuusta badan.

قال تعالي: (وَجُوهٌ يَوْمَئِذٍ نَّاضِرَةٌ * إِلَىٰ رَبِّهَا نَاظِرَةٌ) .

Haddaba qofka adduunka kala tagi waaya cammal wanaagsan ee kala taga wasakh iyo nijaasna waxaa hantiyaysa Naarta si ay uga nadiifiso qudhunkaas, waliba waa haddii ay tahay nijaasada fudud, (dabiyada fudud), haddii kale waligiiba wuxuu ku jirayaa naarta isagoo ku waaraaya intay cirka iyo dhulkuba jiraan(waa markuu gaalnimo ku galee)

Ujeeddada islaamkuna maaha in dadku noqdaan kuwo fiican oo wanaagsan kaliya , waxase uu u

tilmaamayaa in la noqdo kuwo nadiif ah oo aan lahayn usgaga danbiyadda. Waxa uu dadka siinayaa tilmaamo fiican sida dhakhtarka wanaagsan ee Aqoonta durugsan iyo Khibradda fog u leh arrimaha Caafimaadka, uu siiyo bukaankiisa oo kale, Xanuunka ayuu ka baadhaa kadibna waxa uu siiyaa daawaddii ku haboonayd, haddana intaa kuma daayo ee waxa uu u sheegaa waxii dhibaataynaya iyo waxa u fiican , waxa loo oggolyahay iyo waxa aan loo oggolayn ee ay ka mid yihiin Cuntadda ,Cabitaanka iyo shaqooyinka ilaa uu ka bogsanaayo.

Ruuxa jecel bogsashadiida iyo badbaadadiisa waxa uu u qaataa si taxadir iyo digtoonni ku jirto, talloobooyinkaas uu bixiyay dhakhtarkaas ku sifoobay aqoon, waayo aragnimo iyo amaano.

Taasi kaliya waa tusaale uune, waxaan ka arkaynaa habkaas mid ka sareeya inuu leeyahay islaamku, waana mid ku cad tilmaamaha diinta oo dhan, waliba waad ogtihiin in Islaamku yahay diintii illaahay, isagaana kor ahaaye garanaaya waxa odoomahiisa u wanaagsan, waayo isagaa abuuray.

قال تعالي : (أَلَّا يَعْلَمَ مَنْ خَلَقَ وَهُوَ اللَّطِيفُ الْخَبِيرُ)

Aqoonta dhammaystiran ee illaahay koreeye u leeyahay addoomahiisa ayuu diinta ugu sharciyeeyey unna amray Cibaadooyinka, waan mid ay ku jirto wanaagiisa aduun iyo aakhiraba.

Waxaa lagama maarmaan u ah wanaaga qofka iyo dahaaradda ruuxdiisa, Cibaadooyinka kala duwan sida ay cuntooyinka kala duwan lagama maarmaan ugu yihiin jidhkiisa, Haba lahaato Cibaadadaasi culays iyo adayg, marka ugu horaysa ee la samaynaayo, sobobtuna waxa weeyaan wasakhda iyo uskaga ay kaga tageen danbiyadu ruuxda qofka, kuwaasoo cibaadadu xididada u siibayso, dabadeed qofku dareemo cidhiidhi iyo qadhaadh isagoo u malaynaaya dhadhanka cibaadada, laakiin wax kale maaha ee waa Wasakhdii ruuxdiisa ku taalay ee aanu dareemayn.

Cibaadooyinkaasi kuwooga ugu waaweyn, ilaahayna -koreeye- ugu jecel yahay, uguna ajarka badan, waxaa ka mid ah Soonka, waana cibaadada kaliya ee ilaahay -koreeye- isku nisbeeyey

(كل عمل ابن آدم له إلا الصوم فإنه لي وأنا أجزي به)

Waayo soonku wuxuu la gaar yahay sir iyo qarsoonaan ka dhaxaysa addoonka iyo rabigiisa , dadka wuu ka qarsoon yahay, ilaahayna -koreeye

waxa uu ugu jecel yahay Camalka badhax la'a, ee aan lahayn is tus tus iyo i arkaay midnaba, Sidaas awgeed ayuu soonku u noqday barbaariye weyn oo dhanka badhax-tirka ah (ikhlaaska).

Maanta waxa aad loogu baahan yahay macnaha ikhlaaska, iyo iska nadiifinta istustuska, sumcad jacaylka iyo is-muujinta dadka dhabarka ka jabisay.

Soonku maaha cuntada iyo cabitaanka oo la iska daayo kaliya, waa in nafta loo carbiyaa ka saraynta wax kasta oo dhooqaynaaya ruuxda oo wasakhaynaya, waayo ujeedada soonku waa nadaafadda iyo dahaaradda ruuxda qofka, Iyo wax kasta oo wax u dhimaaya saafinimada nafta iyo dahirnaanteeda ,sidaasuu xadiiskani tilmaamayaa.

(من لم يدع قول الزور والعمل به فليس لله حاجة في أن يدع طعامه وشرابه)

Islaamku waxa oo qofka sooman ku dhiirigaliyaa oo ku haggaa meel ka fog waxaas oo dhan, wuxuuna u dardaarmayaa qofka sooman dulqaad wanaagsan iyo cibaadadda oo lagu dedaalo laguna mashquulo. Wuxuu inoo sheegayaa inaan loo jawaabin dadka jaahiliinta iyo kuwa edebta-

darran, waayo jawaabtaasi waa waqti lumis, ruuxduna waxay hoos uga soo degaysaa jihadii koraysay ee ay ku socotay ee soonku gaadhsiiyay.

(فإن سابه أحد أو قاتله فليقل إني امرؤ صائم)

Ruuxa cibaadada aad u danaynaaya umma haboona inuu wax kale kaga mashquulo, Ruuxa salada tukanayaa haduu ku hadlo wax ka baxsan salaada way buraysaa salaadiisaasi, Xajkana waa la mamnuucay waxii ka baxsan shaqada(acmaasha) xajka.

قال تعالى : (الْحَجُّ أَشْهُرٌ مَّعْلُومَاتٌ ۚ فَمَنْ فَرَضَ فِيهِنَّ الْحَجَّ فَلَا رَفَثَ وَلَا فُسُوقَ وَلَا جِدَالَ فِي الْحَجِّ)

Sidaasoo kale ayaanay u banaanayn qofka sooman inuu la yimaado waxaan haboonayn oo uu dhooqaysto, isagoo gaadhay maqaam sareeya oo urta afkiisa sooman ka dhigay inuu ka udgoonaado miskiga ilaahay -koreeye- agtiisa.

(والذي نفسي بيده، لخلوف فم الصائم أطيب عند الله من ريح المسك)

Waxaas oo dhan waxaa ka sii yaab badan in illaahay -koreeye- xidh xidhay shayaadiinta si aanay uga mashquulin ama u khalkhalin dadka

sooman, si ay u helaan gego balaadhan oo ku haboon inay ruuxdo kor noqoto iyo daahiritaankeeda, la kulanka naxariista illaahay.

(إِذَا جَاءَ رَمَضَانَ فَتُفْتَحُ أَبْوَابُ الْجَنَّةِ، وَغُلِّقَتْ أَبْوَابُ النَّارِ، وَصُفِّدَتِ الشَّيَاطِينُ)

Waxaa Xabsi la dhigaa makhluuqaadkaa sharka badan si aanay khal khal uga galin dadka sooman cibaadooda, shayaadiintu waa mujrimiin xun xun oo ay muhiim u tahay inay cibaadada dadka ka qasaan, waa tuugo khiyaamo badan ,waxayna xadaan shayga ugu qaalisan oo ah iimaanka iyo wax kasta oo kaalmeeya iimaanka koriinkiisa, ruuxdana uma ogolaanayo inay sarayso oo ay la kulanto waxii Ilaahay -koreeye- u qoray ee dahaaro iyo kor noqoshada ahaa.

Dhinacyada wanaagsan ee soonku leeyahay waxaa kamida inay dadku iska daayaan shahawaadka iyo waxyaabihii naftu jeclayd , oo ay u jeestaan Ilaahay -koreeye- xagiisa, si ruuxdu u xorrawdo oo u sarayso, ugana maydhanto uskaga danbiyada .

(من صام رمضان إيماناً واحتساباً غفر له ما تقدم من ذنبه)

Danbiyada waxaa la dhaafaa marka laabuha iyo ficiladuba ka nadiifoobaan raadadkii danbiyada,

intaas markuu qofka sooman la kulmo-ilaahay idankii-wuu guulaysanayaa.

قال تعالي : (قَدْ أَفْلَحَ مَنْ رَزَّاهَا)

Waxuu helayaa abaal marin qiyaasteeda Alle-koreye- kaligii og yahay

(كل عمل ابن آدم له إلا الصوم فإنه لي وأنا أجزي به)

Dabadeed waxaa looga dhawaaqaa Albaabkii u gaarka ahaa dadka sooman ee **RAYAAN** si ay janada u galaan.

(إن في الجنة بابا يقال له الريان يدخل منه الصائمون يوم القيامة لا يدخل منه أحد غيرهم يقال أين الصائمون فيقومون لا يدخل منه أحد غيرهم فإذا دخلوا أغلق فلم يدخل منه أحد)

Waxaa u raaca oo ay maqlaan dhawaaq macaan oo odhanaaya

(كُلُوا وَاشْرَبُوا هَنِيئًا بِمَا أَسْلَفْتُمْ فِي الْأَيَّامِ الْخَالِيَةِ)

Cunna oo cabba iyadoo hunguri mar fiican leh waa waxaad soo hor marsateen Maalmihii tegay ee Adduunyada.

Sheekh Xasan Xirsi Cali

